

Halka nalaga helo

Paediatric Assessment Unit
St Ann's Hospital
St Ann's Road
Tottenham
London
N15 3TH

Telefoon: 020 3224 4750
(Maamulaha Ilaalinta Carruurta)

Tilmaamaha

Laga soo bilaabo iridda weyn ee cisbitaalka, raac jidka oo dhan illaa laga soo gaaro maqaayada Oasis. Si toos ah ugu sii wad ilaa waddadu dhinaca bidix u leexato. Waxaad ka gudbi doontaa Xarunta Horumarinta Carruurta bidixdaada. Qaybta qiimaynta carruurta waxay ku taal dhinacaaga midig.

Talo bixinta bukaan socodka iyo xiriirinta (PALS) Haddii aad leedahay amaan, cabasho ama walaac fadlan kala xiriir kooxdayada PALS 020 7288 5551 ama whh-tr.whitthealthPALS@nhs.net

Haddii aad u baahan tahay daabacaad ballaaran, maqal ah ama nuqul la turjumay ee buugyarahan fadlan nagala soo xiriir 020 7288 3182. Waxaan isku dayi doonaa sida ugu fiican ee aan ku dabooli karno baahiyahaaga.

[Twitter.com/WhitHealth](https://twitter.com/WhitHealth)
[Facebook.com/WhittingtonHealth](https://facebook.com/WhittingtonHealth)

Whittington Health NHS Trust
Magdala Avenue
London
N19 5NF
Phone: 020 7272 3070
www.whittington.nhs.uk

Date published: 28/01/2021
Review date: 17/12/2022
Ref: CYP/HarChildProt/CPMAGYP/03-Som

© Whittington Health
Please recycle

NHS

Whittington Health
NHS Trust



Qiimaynta Caafimaadka ee Ilaalinta Carruurta (Haringey)

Tilmaame loogu talagalay dhalinyarada

(Child Protection Medical Assessment (Haringey)
A guide for young people-Somali)



Maxay tahay sababta aan u sameynayo qiimeyntan?

Qiimeynta caafimaadka ee qofka dhallinyarada ah waxaa ka codsanaya hawl-wadeenkaaga arrimaha bulshada inay tahay dib-u-eegis ku saabsan caafimaadkaaga guud iyo ladnaantaada.

Ujeedada qiimeynta ayaa ah in la hubiyo inaad caafimaad qabto oo aad nabdoon tahay.

Xagee ka dhacdaa?

Qiimeyntu waxay ka dhacdaa qeybta qiimeynta caafimaadka ee Isbitaalka St Ann. (Kafiiri qaybta dhabarka ee tilmaamaha).

Maxaa dhacaya qiimeynta dhixdeeda?

Waxaan leenahay goob wax lagu sugo oo leh cabitaanno iyo cunto fudud. Shaqaaluhu waxay kaa caawin doonaan wax kasta oo aad u baahan tahay inta aad sugayso.

Dhakhtarku wuxuu noqon doonaa takhtar takhasus leh oo carruurta iyo dhakhtarka dhallinyarrada ah (dhakhtarka carruurta). Waxay ku bilaabayaan iyagoo sharxaya waxa qiimeyntu tahay iyo weydiinta haddii aad ogolaato (ogolaansho).

Dhakhtarku wuxuu ku weydiin doonaa wax ku saabsan caafimaadkaaga wuuna ku baari doonaa. Waad dooran kartaa haddii aad jeclaan lahayd inuu qof kula joogo inta lagu jiro qiimeynta.

Ma qaadan doontaa waqti dheer?

Qiimeyntu waxay qaadan doontaa in ka badan booqashada GP-ga ama xarunta bukaan socodka, oo socon doonta ku dhowaad hal ilaa laba saacadood. Dhakhtarku wuxuu rabi doonaa inuu fahmo wixii walaac ah ee ku saabsan caafimaadkaaga.

Ma jiri doonaan baaritaano caafimaad?

Mararka qaarkood waxaan weydiisanaa sawir qaade caafimaad inuu sawirro ka qaado astaamaha maqaarkaaga.

Ha welwelin - ma jiri doonaan irbado ama baaritaanno dhiig ah.

Maxaa dhacaya ballanta kadib?

Dhamaadka ballanta, dhakhtarku wuxuu kaala hadli doonaa qiimeynta adiga iyo shaqaalaha bulshada. Dhakhtarka ayaa laga yaabaa inuu codsado ballamo dheeraad ah oo lala yeesho adeegyada kale. Dhakhtarku wuxuu kaloo kaa codsan karaa inaad soo noqotid si aad u aragtid isaga ama iyada taariikh dambe.

Dhakhtarku wuxuu warqad u qori doonaa dhakhtarkaaga guud oo ku saabsan natiijada ka soo baxday qiimeynta. Waraaqdan sidoo kale waxaa loo diri doonaa kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsigaaga waxaana loo diri karaa xirfadlayaal caafimaad oo kale kuwaas oo ku lug leh daryeelkaaga. Warqadda waxaa loo diri doonaa shaqaalahaaga Bulshada waxaana lala wadaagi karaa booliska.

Xusuusnow qodobbada soo socda:

- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad ogolaato qiimeynta
- Dhakhtarku wuu kula hadli doonaa wuuna ku baari doonaa
- Waad dooran kartaa qofka aad jeceshahay in lagula arko.
- Dhakhtarku ma sameyn doono wax adiga ku dhaawici doona

Kani waa fursadaada inaad kala hadasho dhakhtar waxkastoo aad rabto oo ay kujiraan wax walwal caafimaad ah.

